

Maxaan u akhrinayaa heshiikayga?

Marka laga imaado inuu kuu sheegayo kirada lagaa doonayo bil kasta, heshiiskaaga waxa ku jira xogo badan oo muhiim oo lagaa doonayo inaad ogaato ka hor inta aadan guriga kiraysan. Heshiiskaaga waa koontarag qasab ah u dhexeeya adiga iyo mulkiilaha - ma beddeli kartid ka dib marka aad saxiixto, marka iska xubi inaad ku qanacsan tahay ka hor inta aadan saxiixin.



Haddii aad ka soo horjeedo wax ku saabsan heshiiska, ha saxiixin.

Maxaan iska eegayo marka aan akhrinayo heshiiskayga?

Waa in heshiiskaagu ku qoran yahay wax walba aad adiga iyo mulkiilaha aqbasheen. Iska hubi inay sax tahay - haddii aad maxkamada tagtid, heshiiku waxa uu cadaynayaa waxa aad adiga iyo mulkiilaha ku heshiiseen marka aad guriga u soo guurtay. Marka aad akhrinayo heshiiska iska eeg waxyaabahan:



Inta ay noqonayso lacagta kirada iyo debaajiga



In laguugu soo dalici doono lacag haddii aad xili hore guurtid ama in kale



Goorta uu mulkiiluhu kuu sheegayo inta uusan maxkamada ku geyn



Cidi ku noolaanaysa guriga iyo mudada



Cida bixnaysa kharashka gaaska, laydhka, iyo biyaha.



Haddii aad leedahay xayawaano rabaayad ah ama in kale



Inay tahay in adigu aad wixii dayactir ah samayso



Inaad ka masuul tahay qashinka ama dayrka ama in kale



Waxa aad bixinayso hadii uu mulkiiluhu ku dacweeyo



Haday jiraan sharciyo ku saabsan degaanshaha

**Haddii aad jebiso heshiiskaaga, mulkiilahaagu wuu ku eryi karaa.
Haddii mulkiilahaagu jabiyo heshiiskaaga, wac Waaxda la Taliska ka Saaridda.**


Maxaa jira haddii shay heshiiskayga ku jira uu **sharci darro** noqdo?

Heshiiskaaga waxaa laga yaabaa inuu leeyahay **qodobbo "mamnuuc"** ama **"aan laga fiirsan"**. Haddii qodobka ka mid ah heshiiskaagu u muuqdo sharci darro, wac **Waaxda la Taliska ka Saaridda**. Qodob sharcidaro ah oo heshiiska ku jiri kara waxaa ka mid ah:

Milkiiluhu wuxuu "mag siinayaa" naftiisa mas'uuliyadda. Tani waxay ka dhigan tahay in mulkiiluhu uu isku dayayo inuu kaa dhigo inaad aqbashid in uuna wax khalad ah **gali karin**, wax walboo kahalad ah ha sameeyee. Tusaale ahaan, haddii mulkiilahaagu uu jebiyo sharciga oo uu ku dhaawaco, mulkiiluhu wuu kaa qaadayaa xaqa inaad dacwaysid. **Taana waa sharci darro.**

Haddii mulkiilahaagu uu geliyo heshiiska qodob sharci darro ah oo aad saxiixdo, maxkamaddu **ma fulin doonto** qaybtaas heshiiska. Taasi ma **burinayso heshiiskaaga oo dhan**. Waxaad weli u baahan doontaa inaad raacdo inta kale ee xeerarka heshiiskaaga.

Heshiiskaygu wuu **dhamaanayaa.** Maxaan sameeyaa?



Sida caadiga ah waxaa lagaa doonayaa inaad **u sii sheegto mulkiilahaaga** haddii aad rabto inaad ka baxdo ama aad saxiixdo heshiis kale. Inta badan heshiisyadu waxay leeyihiin tilmaamo ku qoran. Si aad u diyaargarowdo, iska hubi inaad:

1. **Dib u akhri heshiiskaaga mar labaad muddo ka dib.** Tusaale ahaan, haddii heshiiskaagu uu jiro 1 sano, mar kale akhri 6 bilood ka dib marka ay kuu suurto gasho. Raadso wax kasta oo ku saabsan dib u cusboonaysiinta kiradda, gaar ahaan qodobbada **"cusboonaysiinta tooska ah"**!
2. Iska hubi haddii aad u baahan tahay inaad siiso mulkiilahaaga **ogeysiis** ku saabsan cusbooneysiinta heshiiskaaga iyo in kale. Sida caadiga, mulkiilayaashu waxay u baahan yihiin **ogaysiis 30, 60, ama 90 maalmood** ka a hor in loo sii sheego in kiraystuhu uu doonaya inuu heshiiska cusbooneysiyo iyo in kale. Raac tilmaamaha. Ku **qor** ogaysiiska waraaq oo **koobi ka samayso!**

Goorma ayaan jebin karaa heshiiskayga oo aan goor hore ka bixi karaa?

Waxa jira xaalada gaar ah oo aad jebin kartid heshiiska adiga oonan lagu ganaaxin. Tusaale ahaan, haddi **tacdi** laguuso sameeyo, ama gurigaaga uu **dab, daad, ama masiibo** kale waxyeelo ka soo gaadho, ama haddii uu mulkiilahaagu kuu **diido inaad dayactir samayso**, waxaas oo dhan heshiiska ayaad kaga bixi kartaa xili hore.

Haddii aad jebiso heshiiskaaga sababo kale oo an ahayn kuwa xagga sarre ku xusan, waxa laga yaabaa inaad bixisso ganaax ama biloo kiro oo dheeraad ah, xitaa ka dib markaad baxdo.

Haddii aad ka fikirayso inaad jebiso heshiiskaaga, wac Waaxda la Taliska ka Saaridda.



LEGAL AID SOCIETY
OF MIDDLE TENNESSEE AND THE CUMBERLANDS

(833) 837-HOME



(615) 988-6460



conexión
americas

(615) 701-7957

